



Eeg!

Darawalada:

- Jidka u banee dadka lugaynaya xaga dadku ka gudbo iyo isgoosyada -- waa sharci.
- Ha xanibin halka dadku ka gudbaan marka aad joogsanayso. kala goosyada.
- Qabooji oo adeec xadka xawaaraha la soo dhejiyay.
- Feejignaan dheeraad ah qaado hareeraha dugsiyada, garoomada iyo jaararka.
- Had iyo jeer iska eeg dadka jidka lugaynaya, gaar ahaan ka hor cagaarka ama calaamada “midig u leexo casaanka.”
- Weligaa ha ordin nalalka cas.
- Feejignow markaad dhaafayso baabuurta la joojiyay. Waxaa laga yaabaa inay ka joogsanayaan dadka jidka maraya.
- Ka digtoonow! Qoraal ha qorin oo baabuur ha wadin!
- Wadaag jidka. Waa masuuliyadaada inaad raadiso kuwa kale.

Badbaadada Qofka lugaynaya: Shil maaha.

Ay maalgeliso Maamulka Badbaadada Jid marida National Highway oo wadata deeqda ka timaada Badhasaabka NYS Guddideeda Badbaadada Jid marida.



Department
of Health



La Arko

Dadka jidka maraya:

- Ka gudub isgoysyada iyo meesha dadku ka tallaabo ee calaamadsan.
- Cadaadi batanka riixida qofka lugaynaya oo SUG ishaarada in la gudbo.
- Inta aanad gudbin, eeg bidix, midig, ka dibna mar labbaad bidix iyo garabkaaga korkiisa baabuurta soo leexanaysa.
- dhabada jidka dhinaceeda ee dadka. Haddii aanay waxba jirin, ku jeeso jidka markaas waxaad aragtaa baabuurta, oo darawaladu way ku arkaan.
- Ka digtoonow! Fariimo ha qorin marka aad marayso halka dadku ka gudbaan!
- La samee xidhiidhka indhaha darawalada markaas way ku arkaan.
- Ha lagu arko mugdiga ka dib iyo jawiga hawada xun addoo xidhan dharka midabka khafiifka ah leh ama nalka soo celiya.
- Kedis ha u hor tallaabsan basaska hortooda iyo baabuurta waa wayn. Waxay qaataan in la joojiyo wakhti ka dheer baabuurka.
- Iska eeg gawaadhida waa wayn iyo basaska dib uga soo baxaya meelaha baabuurta la dhigto iyo jidadka guryaha gala.

Badbaadada Qofka lugaynaya: Shil maaha.